

Soomaaliya oo qeexaday waxyaabaha mudnaanta la siinayo si ay taageero cusub u siiyaan waaxda waxbarashada Midowga Yurub iyo Caalamkuba

07/05/2014

Maanta, shir ku saabsan waaxda waxbarashada oo lagu qabtay Muqdisho ayaa wax ka soo qayb galay Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta Sare, Maamul Goboleedyada, Midowga Yurub, Deeq bixiyayaal kale, hay'adaha fuliya mashaariicda, Ururada bulshada, Waxbarashada gaarka loo leeyahay, iyo Aqoonyahano. Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo deeq bixiyaaysha ayaa wada yeeshay shir ay kaga hadleen mudnaanta la siinayo barnaamijyada cusub ee waxbarasho ee ay maalgalinyaan Midowga Yurub.

Kulankii farsame ee wadatashiga ahaa kuna saabsanaa waxbarasho ee lagu qabtay Muqdisho wuxuu ahaa guul. Waxaa intaa dheer, waxaa la ogolaaday in dawladda Soomaaliya ay dib u eegis ku samayso mudnaanta barnaamijyada waxbarashada si wanaagsan loo ogaado taageerada Midowga Yurub mustaqbalka ee qaybta waxbarashada.

"Hadii aan doonayno inaan taageerno mustaqbalka Soomaaliya, Waxaan u baahanay inaan maalgelinta koobaad siino dhalinyarta iyo caruurta Soomaaliyeed. Ayuu yidhi ergayga gaarka ah ee Midowga Yurub u qaabilsan Soomaaliya, Michele Cervone d'Urso. Taageeradan cusubi, waxay tahay qayb ka mid ah hawl-gelinta Heshiiska Cusub (New Deal), Midowga Yurub wuxuu run ahaantii sii wadayaa inuu taageero helitaanka waxbarasho iyo tababar, iyo in sare loo qaado awoodaha waxbarasho ee maamulada iyo tayada waxbarashada. " Si waafaqsan heshiiska (New Deal) ka, Midowga Yurub wuxuu bixinayaa 11ka (Sanduuqa Horumarinta Yurub) ee cusub, wuxuu bixinyaa baqshadda cusub oo 45 milyan oo Euro si loogu horumariyo waxbarashada Soomaaliya, waa xadi lagaceed oo la sii dayn doono mudada heshiiskan 2014-2016. Tani waxay dheeraad ku tahay 85 Milyan Euro oo taas oo la siiyaya waaxda waxbarashada Soomaaliya ee hoos imanaysay 10ka (Sanduuqa Horumarinta Yurub) ee (2008-2013).

Taageerada cusub ee Midowga Yurub wuxuu waafaqsanaan doonaa Qorshayaasha iyo Istaraatiijayda Waaxda Waxbarashada ee la yidhaahdo Dugsiyada Aada. Dhamaad.



EU MISSION TO SOMALIA

Delegation of the European Union to Kenya

P.O. Box 45119 Nairobi | Insurance House, Ragati Road, Upper Hill

Tel.: +254 (0)20 280 20 00

Email: SOMALIAMISSION@eeas.europa.eu

Website: <http://www.eu-somalia.eu>

Twitter: [@SomaliaEU](https://twitter.com/SomaliaEU) | Flickr: [EUSomalia](https://www.flickr.com/photos/eusomalia/) | Youtube: [EU SOMALIA](https://www.youtube.com/channel/UC8Wz1v8v8v8v8v8v8v8v8v8)